+Pass
DISCOVER MORE OPPORTUNITIES

Aad ayay muhiim u tahay in aad ogaato goorta iyo goobta uu ubadkaaga baska iskuulka ka soo fuulayo iyo barta uu uga degayo. Arday kasta oo dhigta DPS xaq u leh-inuu raaco baska iskuulka ee jaallaha waxaa laga filayaa inuu maalin kasta isticmaalo +Pass, cidna lakala sooceyn. Haddii laguu badellayo baaska ama aad ubaahan tahay mid ku meelgaar ah, fadlan la soo xiriir xafiiska iskuulka ama Adeegyada Gaadiidka inta lagu jiro bilaha xagaaga.

Booqo **transportation.dpsk12.org** si aad u hesho xogtii ugu dambeysey ee jadwalka iyo dariiqyada baska. Marka ay dhacaan xaalado gurmad, iskuulka waa lagu soo wargelin doonaa oo si toos ah ayay xiriir la samayn doonaan waalidiinta/ardayda.

SIDA +PASS USHAQEEYO

1. Ardayda kaarkooda +Pass ayaa waxay dulsaarayaan aqriyaha kaarka marka ardayga uu fuulayo iyo marka ardayga uu baska ka degayo.
2. Aqriyaha kaarka oo biib ayuu dhahayaa oo cagaar ayuu noqonayaa, taasoo xaqiijin u ah in +Pass uu qabtay.
3. Saacadda, taariikhda iyo goobta uu ardayga ka soo fuulay iyo goobta uu baska kaga degay isla markiiba waxaa lagu keydiyaa kaydka macluumaadka oo ammaan ah, oo ay kala soo bixi karaan oo kaliya mas'uuliyiinta iskuulka iyo mas'uuliyiinta gaadiidka.

BADDALAADA & +PASS KU MEELGAAR AH

- Pass-ka ku meelgaarka ah waa in laga soo qaataa xafiiska hore ee iskuulka oo waxaa la isticmaali karaa ilaa iyo shan maalmood. +Pass aan ku meelgaar ahayn waa in aad soo qaadataa.
- +Pass kaa lumay si aad badelkeeda u hesho, booqo xafiiska hore ee iskuulka.

ARDAYDA:

- Dhammaan ardayda oo dhan waa in +Pass ay maalin kasta isticmaalaan.
- +Pass-kaaga saar goorta aad baska iskuulka soo fuulayso IYO goorta aad baska iskuulka ka degayso
- Ardayda kaarkooda +Pass iyaga ayaa mas'uul ka ah. Fadlan kaarkaaga ha ruugiin, ha jejebin ama ha iska lumin.

Macluumaad intaa dheer, booqo transportation.dpsk12.org/pass.

WAALIDIINTA:

- Waxaad hubisaa in ubadkaaga isticmaalo kaarkooda +Pass mar kasta oo ay baska iskuulka ay raacayaan
- Goorta ay dhacaan xaaladdo deg degga ah, +Pass wuxuu mas'uuliyiinta Gaadiidka iyo mas'uuliyiinta iskuullada ay u ogolaataa in si sax ah ay u ogaadaan ardayda baska saaran
- +Pass DPS wuxuu saamaxaa inuu balaariyo helitaanka oo wuxuu wanaajiyaa wadahadalka waalidiinta

ILLOOYIN

- **Xafiiska Iskuulka:** Iskuullada ayaa ah barta koowaad ee aad la soo xiriirayso, oo kuu kala caddeyn kara xogta baska ee Infinite Campus.
- **Dirida Baska: (720) 423-4624**
  (5:30 a.m. – 7:30 p.m.)
  - Baska oo 15 daqiiqadood soo daahay
  - Ardayga baska ma saarna
  - Arday ayaa maqan
  - Walxaha la helay iyo walxaha lumay

  Amniga & Ammaanka DPS: (720) 423-3911 (7:30 p.m. ka dib ama xaaladdo gurmad)
- **Gaadiid: (720) 423-4600**
  transportation@dpsk12.org
  - Xogta baska & dariiqa
  - Su'aallaha +Pass
  - Macluumaad Guud
- **Safe2Tell®: 1 (877) 542-SAFE**
  - Warbixinta welwelka ammaanka ardayda
- **Barta Waalidka: myportal.dpsk12.org**
  Hadda waalidiinta xogta muhiimka ah ee ardayda ay kala socon karaan, oo ay ku jiraan:
  - Faahfaahinta dariiqa baska (barta iyo saacaddaha baska soo istaago)
  - Isticmaalka kaarka +Pass
  - Wixii muhiim ah ee ka soo cusboonaaday gaadiidka

  La xiriir iskuulka si aad isugu soo qorto Barta Waalidka

XAQ ULAHAANSHAHA

Adeegyada gaadiidka waxaa laguugu diyaariyay iyadoo lagu salaynayo shuruudaha xaq u la'haanshaha ee uu bixiyo Guddiga Waxbarashada.

- **Dugsiga Hoose:** Ardayda dhigata fasalada K-5 waa in lagu qoraa oo ay degan yihiin in ka badan hal maayal in ka baxsan xuduuda iskuulkooda.
- **Dugsiga Dhexe** Ardayda dhigata fasalada 6-8 waa in lagu qoraa oo ay degan yihiin in ka badan 2.5 maayal in ka baxsan xuduuda iskuulkooda.
- **Dugsiga Sare:** Ardayda dhigata fasalada 9-12 ee degan in ka badan 3.5 maayal in ka baxsan xuduuda iskuulkooda waxay xaq u leeyihiin in ay ka qeybqaataan barnaamijka RTD baas.

Xusuusow: Gaadiidka la iskuma hubo. Gaar ahaan tani muhiim ayay u tahay maadaama waalidiinta sannadkan ay soo maraan isku soo qorida SchoolChoice.

AAN KA AHAYN HANAANKA

Haddii arday uu ubaahan yahay gaadiid bas oo uusan soo buuxin shuruudaha xaq u la'haanshaha uu Guddiga Waxbarashada meel dhigay, soo dhammaystir foormka gaadiidka. Ka baxsanaanta waxaa dhici karta in la ogolaado haddii boos uu jiro. Foormamka qatka internetka ayaa laga heli karaa transportation.dpsk12.org/eligibility. Wixii su'aallo ah kala xiriir (720) 423-4699 (Isniin-Jimce, 8 a.m.-3 p.m.).

MACLUUMAADKA BASKA EE MUHIIMKA AH

MAALINTA 1AAD EE ISKUULKA KA HOR

- Eeg xogta wadada baska (AM & PM labada)
- Xusuusnow lambarka dariiqa baska
- Ogoow saacaddaha baska uu qaado iyo saacaddaha uu soo dhigo
- Booqo barta(aha) baska uu joogsado
- Shaqaalaha baska isu sheeg qofka aad tahay

TAGADI IYO KA SOO NOQOSHADA BARTA BASKA UU JOOGSADO

- Barta baska soo istaag ugu yaraan 10 daqiiqado ka hor
- Raac dariiqa ugu amaanka ah oo aad ku tagayso ama aad ugu soo noqonayso barta baska uu istaago
- Hala hadlin ama yuusan ku qaadan qof aadan garanayn!
  - Haddii qof aadan garanayn ku soo abaaro, isla markiiba u sheeg qofka baska wada
- Baska ka fool barta uu istaago iyo saacadda uu soo istaago
- Haddii baska uu kaa tago, ama ka daaho in ka badan 15 daqiiqadoo, soo wac (720) 423-4624
  - OGOOW: Waxaa dhici karta in basaska ay soo yara daahaan laba todobaad ee ugu horeeya ee iskuulka, maalmaha barafka, ama wadada oo mashquul ah awgeed

BARTA BASKA UU ISTAAGO

- Hantida ku wareeggan barta baska istaaggo dhowr. Qashin ha ku tuurin ama ha ku socon barta wax lagu beeray
- Isku diyaari in baska aad fuusho, oo meel ammaan ah ka istaag wadada/marshi-biyeedaha
  - OGOOW: Darawalka baska hoonka ma yeerin kara inta uu jooggo barta baska istaaggo si rakaabka loogu wargeliyo in baska soo istaagay. Fadlan imow waqtiga lagugu talagaley
- Ka fogow soonaha halista ah (eeg sawirka hoose)
- Gacanta ku qabso +Pass markaad fuulaysid

RAACITAANKA BASKA

- Dhammaan ardayda oo dhan waa in +Pass ay maalin kasta isticmaalaan!
- Kursigaaga ku ekow oo wajigaaga horey aadi
- Lugaha iyo cagta ka fogee barta dhexda ee lagu socdo
- Korkaaga oo dhan waa inuu baska gudihiisa ku jiraa
- Qofna kursi ha u qaban
- Codkaaga hoos u dhig inta aad saaran tahay baska iskuulka si wadaha baska aadan qalqal uga gelin wadida baska
- Walxo waweyn, oo halis ahna baska dhexdiisa waa ka mamnuuc
- Alwaaxa afar shaaglaha ah ee lagu ordo iyo qalabka ciyaaraha waa in boorsada lagu xareeyaa

KA DEGISTA BASKA

- Ardayda waxay baska kaga degan karaan barka baska istaago ee loogu talagalay oo kaliya
- Haddii loo baahdo in ardayga uu ka deggo meel kale, waa in waalidka iyo maamulaha iskuulka laga helaa ogolaansho qoraal ah
- Kursiga sii fadhi ilaa baska uu si buuxa u istaago oo albaabkana la furo

TILMAAMO GAAR AH

- ARDAYDA WAXBARASHADA GAARKA: Waalidka, mas'uulka ama qofka kale ee qaangaarka ah ee loomagacaabay waa inuu barta baska istaaggo ku sugaa goorta tilmaamaha darawalka baska uu sheegayo in ardayga aan kaligii looga tagi karin.
- Dhammaan ardayda dugsiga barbaarinta caruurta (kindergarten) dhigata ee nus maalmeedka iyo ardayda ECE, waa in barta baska uu ku sugaa qof mas'uul ah. Ardayda dugsiga barbaarinta caruurta waxaa la soo daayaa dhammaadka maalinta waxaa lagu dejinayaa barta baska istaago ee lagu qoray walaalkiisa/eeda ka weyn ama qof qaangaar oo mas'uul ah, oo kaligooda looguma tagayo.
- Ardayda aan barta baska loogu tagi karin, oo aan qof qaangaar ahna ku sugeyn, baska ayuu sii saarnaan doonaa oo wadada lagu celin doonaa. Sidaas awgeed, waxaa dhici karta in ardayga terminaalka baska la geeyo.

AQLAAQDA ARDAYGA EE BASKA

- Muuji tixgelin, Kalmado Naxariis Isticmaal, Marka koowaad waa Badbaadada
- **Gefafka Aqlaaqda Halista ah** Edebdarada waxaa ka mid ah: dibindaabyada/af xumo, dagaal/weerar dagaal, kadeed/foorjo, hantida oo wax loo geysto/khasaare gaysasho, tuugnimo, edeb daro galmo, shaqaalaha gaadiidka oo la af lagaadeeyo.
- **Xoog isu sheegasho:** DPS looma dulqaadanayo xoog isu sheegashada. Haddii arday loo xoog sheegto ama dareemo inuusan badbaado ku qabin, ardayga waxaa laga codsanayaa in uu isla markiiba wadaha baska ama kaaliyaha baska usoo sheego wixii welwel ah.

Qeybta gaadiidka waxay xaq u leedahay in ay ardayga ay ka joojiso inuu baska lagu geeyo howlaha ciyaaraha iskuulka ka dib, ama ardayda ay aqlaaqdooda aad u xuntahay oo ardayga uu ammaanka halis gelinayo kuwa kale ee baska la saaran. Sidoo kale ardayda waxaa dhici karta in ay cawaaqibbad ay kala kulmayaan sida hoos timaada Xeerka Guddiga Iskuulka ee hoos timaada.

GAADIIDKA ISBADELLA

- **Iskuulka Baaskiil lagu tagayo:**
  - Xiro koofada ammaanka iyo walxaha ammaanka
  - Qaado wada/isla jihada ay ku socdaan baabuurta kale
  - Iska fiiri baabuurta
  - Sadarka toosan ku soco
  - Joogso oo iska fiiri ka hor inta aadan wada galin ee aad guriga ka baxayso
- **Iskuulka oo Lug lagu tago:**
  - Ardayda kale lala lugeeyo
  - Muuqo
  - Iska fiiri baabuurta
  - Jidka si ammaan ah ku gooy oo ka gooy barta jid-gooyga, adiga oo mar kasta isticmaalaya marsha-biyeedaha
  - Oofi calaamaddaha jidka, nalka iyo waardiyaha jodgoynta iskuulka

Joogso! Sharcigaa ah!

- **Nalka oo birbirqaya micnaheedu waa JOOGSO**
- **Carruur ayaa ka ag dhow**
- **Ha goyn ilaa ay ka joogsanayaan nalka birbirqaya**